

Halkaan ayaad ka helaysaa waxa aad u baahan tahay inaad oggaato haddii korontadu kaa tagto

City Light waxay aad uga shaqaysaa bixinta koronto la isku halayn karo, laakiin mararka qaar waxaa kaa go'i karta korontada marka korontadu baxdo. U adeegso khayraadkaan si aad u hesho koronto inta korontadu maqan tahay:

- Fiiri khariiradeena meelaha korontadu ka maqan tahay – seattle.gov/light/outage
- Nagala soco barta Twitter-ka: twitter.com/SEACityLight
- La soco wararka cimilada deegaankaaga

Dhawr badqabkaaga marka korontadu tagto:

- Diyaarso kiishada marka ay korontadu tagto aad isticmaasho oo ay ku jiraan biyo, cunto, bustayaal, tooshash
- Ka fogoow ugu yaraan 20 fiit (6 mitir) fiilooyinka korontada ee soo dhacay
- Haku adeegsan shooladaha gaaska ama dhuxusha gudaha guriga
- Difaac ehelkaaga ku sugan guriga kuwaas oo ku tiirsan qalabka caafimaadka adoo ka qoraaya Life Support program (barnaamijkeena Taageerada Nolasha)

Si aad u heshid macluumaad badan, booqo: <https://powerlines.seattle.gov/outage>

iskudarka Tamarta

Sanadkii 2005, City Light ayaa noqotay shirkada koobaad ee wadanka kutaala oo kuguulaysata inay meesha ka saarto sunta kaarboonka. Waxaan ku gaarnay guushaan anagoo bixina tamar dhawraysa badqabka bii'ada oo lagu baxsho xarumaheena tamarta biyaha ee nadiifta ah, sida aad ku arki karto ilaheena tamarta ee 2019 oo hoos ku qoran.

(Jaantus)

*City Light ma lahan khayraadka dhuxusha ama ilaha dabiiciga ah oo ku jira meelaha ay tamarta kasoo saarto. Waxay samaysaa iibsiyada suuqa si ay iskugu dheeli tirta ama isku waafajiso culaysyadeeda ama khayraadkeeda. Iibsiyadaan, oo ay la socdaan iibsiyada suuqa ee ay sameeyaan Bonneville Power Administration (BPA, Maamulka Tamarta ee Bonneville), ayaa laga yaabaa inay ku jiraan dhuxul ama khayraadka gaaska dabiiciga ah, kuwaas oo xaruntu isticmaasho. Sun kasta oo kasoo baxda agabka aan la sheegin ee suuqa laga iibsado waxaa meesha ka saaraaya xeerkeena ka hortaga sunta gaaska cagaaran (GHG) ee hawada.

**Shidaalkaan waxa uu matalayaa qeyb ka tirsan quwadda laga soo iibsado BPA.

Qiimee badqabka geedahaaga xiligaan jiilaalka

Maadaama inta badan caleentu soo dhacday, hadda ayaa ah waqti ku habboon inaad qiimayso qaab dhismeedka geedahaaga. Raadi laamo jaban ama dilaacay kuwaas oo soo dhici kara inta dabayluhu socdeen. Isha ku haay laamaha geedka ee xoqaaya fiilooyinka korontada. Haddii geedahaagu keeni karaan cilado dhanka ammaanka ah oo ka yimaada fiilooyinka korontada, la xariir Seattle City Light

Vegetation Management (Maamulka Geedaha ee Seattle City Light) oo aad ka helayso seattle.gov/light/vegetation-management/contact-us.asp ama (206) 386-1733 si ay qiimayn ugu sameeyaan walaacaaga. Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan Seattle City Light's Vegetation Management (Barnaamijka Maamulka Geedaha ee Seattle City Light), ka fiiri websetkeena barta seattle.gov/light/vegetation-management. Marka aad oggaato in geedahaagu ay amaan yihiin, waxaad ku raaxaysan kartaa muuqaalkooda ay ifinayso qorax dhaca qurxoon ee xiliga jiilaalka.

Green Up (Cagaarka Kor)

Wax ku biiri mustaqbalka tamarta cagaarka ah oo adkeysii leh, adoo ku biiraya City Light Green Up (Barnaamijka Cagaarka ee City Light). Baro sida aad saamayn u yeelan karto adoo booqanaaya seattle.gov/light/greenup ama wacaaya (206) 684-3800.

Waxay Ka shaqaynaayan Xaafadaada

Kooxda Seattle City Light waxay joogaan xaafadahaan, ayagoo kashaqaynaaya bixinta adeegyo waxtar leh:

- Arroyo/South Arbor Heights: gelinta fiillooyin dhulka hoostiisa, saqafyada iyo nalalka wadooyinka ee lagu badelaayo kaabayaal aan dhamaaneen.
- South Park: waxaa casriyayn lagu samaynayaa nalalka hoos u jeeda ee LED ka ku shaqeeya ee State Route 509 overpass oo ku yaala wadada South Cloverdale.
- Dhammaan Aaga adeegga ee City Light: waxaan badelaynaa baalayaasha korontada ee duqoobay dhammaan aaga adeegga korontada xarunta si aan kor ugu qaadno badqabka iyo isku halaynta korontada.

Kan waa liis aan dhamaystirneen. Haddii aad rabto sharaxaad booqo seattle.gov/light/atwork si aad hesho qariiradeena aadna waxbadan uga barato mashaariicda gaarka ah ee xaafadaada ka socda.

TALLADA BADBAADADA KASOCOTO GOOBTA

“Duufaanada qaboowaha waxay horseedaan dhicida fiilooyinka korontada. Haddii aad dhulka ku aragto fiilo koronto, mar walba u qaado inay danabaysantahay. Ka fogoow ugu yaraan 20 cag waxaadna wacdaa 911.”

Biil bixinta oonleenka ah

Ku raaxayso fududaynka ku bixinta biilkaaga qaab oonleen ah! Maanta iska qor Biil bixinta oonleenka ah kana faa'iidayso adeegyadaan:

- Qarashka ku bixi kaarkaaga daynta, kaarkaaga baanka, ama nambarka koontada jeega
- Dagso lacag bixin soo noqnoqota ama mid hal mar ah
- Helitaanka isticmaalkaaga korontada maalin kasta (haddii aad haysato cabirka korontada oo casri ah)

- Inaad si fudud iskaga qorto miisaaniyada biilka
- Qalabka adeegyada macaamiisha oo casri ah
- Dhawr Bii'ada! Iska yaree isticmaalka waraaqaha!

Hadda isqor: <https://myutilities.seattle.gov/eportal/#>

Seattle City Light

700 Fifth Avenue
PO Box 34023
Seattle, WA 98124-4023

Su'aalo, faallooyin ama Soojeedin?

limeel noogusoo dir SCL_Communications@seattle.gov

Wargeyska wuxuu ku diyaarsanyahay Isbaanish, Vietnamese, Shiineys, Soomaali, Tagalog and Korean barta seattle.gov/light/pubs/lightreading.asp ama wac (206) 684-3000.